

















Minnesota waxay aqoonsan tahay in dadka dhalinyarada ah ee looga faa'iidaystay galmada ay u baahan yihiin faham, taageero, iyo adeegyo. Xitaa waxaa jira sharci ilaaliya oo caawiya dadka dhallinyarada ah, oo loo yaqaana Sharciga Minnesota ee Safe Harbor. Haddii aad ka yartahay 24 ama kayar, sharcigu wuxuu kaa caawin karaa inaad hesho adeegyo aad wax uga qabato baahiyahaaga, sida guriyeynta, cuntada, taageerada sharci, la-talinta, iwm. Haddii aad ka yartahay 18 jir, Sharciga Safe Harbor wuxuu kaa ilaalin karaa in dembiga. ka faa'iideysiga galmada ee kugu dhici karta lagugu xukumo

**Safe Harbor ayaa ku caawin karta haddii:**

- Aad nooc kasta ee galmo ah, sawirro qaawan, ama fiidhiyowyo ku beddelanayso shay kasta oo qiimo leh. Tani waxaa ku jiri kara, meel aad joogto ama seexato, cunto, dhar, xafaayad, lacag, daroogo ama qamri, ama jago burcadeed ama xaalad koxeed.
- Aad kayar tahay 18 jir aadna ku lug leedahay qoob-ka-ciyaar qalaad ama sawirada qaawan adigoo ku beddelanayo wax qiimo leh.
- Qof uu kugu hanjabayo sawirro ama fiidhiyowyo qaawan si uu kuugu qasbo inaad sameysid wax aadan rabin inaad sameyso.
- Aad dad ugu galmoonaysid lacag lagana yaabo inaadan adiga wada qaadan lacagtaas.

***Waxaa aaggaaga jooga u-doodayaal kaa caawin karo inaad ogaato xulashooyinkaaga.***

SAFE HARBOR

Waa maxay ka faa'iidaysiga galmada? Ka faa'iideysiga galmada wuxuu dhacaa markii wax kasta qiimo leh ama ballanqaad qiimo leh (sida lacag, daroogo, cunto, meel aad joogto, kiro, ama jago sare ee burcad ama kooxeed) lagu siiyo adiga ama qof kale iyadoo lagu beddelanayo nooc kasta oo ah galmada.

**1-866-223-1111**

KHADKA TALEEFOON EE MAALINTA KOOWAAD EE LOOGU TALAGALAY HOYGA DEEGAANKA & ADEEGYADA TAAGEERADA:

**U DIR FARIIN: 612-399-9995**

***KHADKANI WAA MID BADBAADO LEH. MA JIRTO XUKUMID, MA JIRTO CEEBAYN, TAAGEERO KALIYA.***

*MDH © 2017*